



REAL LEARNING FOR REAL LIFE

Su'aalaha Badanaa la Iswaydiiyo: Guudmarka Common Core

Waa maxay Heerarka Gobolka Common Core?

Heerarka Gobolka Common Core, ama "Common Core," waa hadafyo waxbarashada tacliineed ee fasallada K-12 ee xisaabta iyo farshaxanada luuqadda Ingiriiska. Common Core wuxuu dhigaa ahdaaf ama heerar shiishka saaraya faham qotodheer ee maadooyinka aasaasiga ah si si fiican loogu diyaariyo ardayda inay guulaystaan kuuliyadda, shaqada, iyo nolosha. Common Core waa qayb ka mid ah Heerarka Waxbarashada Gobolka K-12 ee Washington waxaana la hirgaliyey 2011.

Waa maxay faraaq u dhexeeya heerarka Common Core iyo Manhajka?

Common Core waa heerar waxbarasho oo cad kaasi oo baahinaya ahdaafta la wadaago iyo filashooyinka aqoonta iyo xirfadaha ardaydu ay tahay inay yeeshaan heer fasal oo kasta. Heerarka waxbarashadu waa ka duwan yihiin manhajka ama qorshayaasha casharka. Marka Common Core uu dhigayo filashooyin sare waxa ay tahay ardaydu inay ogaadaan, ma dhigayo qorshe cashar ama uma sheegayo macalimiinta sida loo baro.

Manhaj wuxuu ka kooban yahay agab baris iyo barasho oo macalimiintu isticmaalaan si ay u caawiyaan dhisidda qorshayaasha casharkooda iyo barista maalinlaha ah. Common Core, macalimiintu wali waa abuurka karaan qorshayaasha casharka baris sargo'an si loo buuxiyo baahiyaha arday kasta fasalkiisa dhexdiisa.

Ayaa soo saaray Common Core?

Common Core waxa abuurka gobollo, waxaana loo abuuray gobollo. Boqolaal macallin, cilmi-baarayaal waxbarasho, xisaabyahanno, iyo khabiirro kale oo waddanka oo dhan ayaa iska kaashaday soo saarista Common Core, iyada oo badhasaabka gobolka iyo kormeerayaasha guud ee dugsiyada gobolku ay door hoggaamineed ku lahaayeen ilaa 2009. Boqolaal mutacalin oo ka socda Gobolka Washington ayaa aragti ka dhiibtay habkaan.

Sidee ayuu Common Core u horumarinayaa tayada waxbarasho?

1. **Aqoon u yeelashada agabka.** Heerarka Common Core waxa loogu talagalay hubinta faham xaqiiq ah. Agabku wuxuu lagu sii gundo-degi mawduucyada qaar, sidaa darteed carruurta aqoon ayey u yeelan agabka halkii ay xifdiyi lahaayeen. Barashadu waxay in badan ahaan mid toos ah/tadbiiqi ah iyada oo shiishka la saarayo waxa ardaydu isticmaali doonaan nolosha xaqiiqda.
2. **Sameeynta fekerka dhabta ah.** Heerarka Common Core waxay xoogga saaraan aasaaska waxbarashada si ay ardaydu si dhab ah ugu fahmaan aragtiyaha aasaasiga ah uguna isticmaalaan inay noqdaan sameeynta fekerka dhabta ah.
3. **Iskaashiga macalinka.** Macalimiinta wadanku waxay awood u yeelan doonaan inay iska kaashadaan oo wax kala korodhsadaan sababtoo ah gobolada oo dhan waxay isticmaalayaan heerar sare oo isku mid ah. Macalimiintu sidoo kale waxay haystaan wakhti dheeraad ah oo ay ku baraan afkaarta iyo aragtiyaha ugu faa'ida badan, kuwaasi oo ka imanaya shiish saarka buundooyinka imtixaanka ee hore kuna waajahan waxbarashada ardayga.
4. **Waafaqsanaan, filashooyin sare dhammaan ardayda.** Ka hor Common Core, waxa u xisaabsan shaqada heerka fasal hal gobol waxa dhici karta inuu ka yar yahay celceliska gobol kale. Common Core wuxuu bixiyaa heerar barasho iyo filashooyin si aynu si dhab ah ugu ogaan karno sida ardaydu ay u wadaan dugsiya, meesha ay doonaan ha ku noolaadaane.

Miyay dugsiyada iyo macalimiinta deegaanku ay wali saamayn ku leeyihiin manhajka iyo go'aanada kale ee deegaanka?

Haa, Common Core waa heerar siiya qaabdhismeed waxa ay ardaydu tahay inay ogaadaan heer kasta oo fasal. Sida heerarkan loo baro waxay khusaysaa degmo dugsiyeedka 295 ah iyo inta ka badan 2,000 ee dugsi ee Washington. Macalimiinta dugsi kasta iyo degmo kasta waxay yeelan doonaan u sahalid iyo maamul ay ku saamaynaan inay ugu dejiyaan manhajka sida ugu fiican u buuxinaya baahiyaha ardaydooda.

Sidee Common Core u taageerayaa dhaqaale xooggan?

- 1. Waxaanu ku nool nahay dhaqaale caalami ah iyo bulsho socota.** Tusaale ahaan, qoysaska ciidanku si joogto ah ayey u kala guuraan gobolada, xirfadlayaasha teknoolajiga aad ayey u socod badan yihiin, Washington-na kaliya lama tartamayso gobolada kale laakiin waxay la tartamaysaa qaramada kale. Common Core, waxaynu xaqiijin karnaa in ardaydeenu ay baranayaan xirfadaha ay uga baahan yihiin inay u diyaargarobaan dhaqaalaha caalamiga ah.
- 2. Dhisidda xirfadaha muhiimka ah ardaydu waxay uga baahan yihiin suuqa shaqada.** 2013, Washington waxay lahayd 25,000 oo shaqooyin shaqaalaha xirfadda sare u baahan ah oo aan la buuxin – tiradaasina waxa la saadaalinayaa inay noqon doonto 50,000 marka la gaadho 2017. Gobolkeenu wuu leeyahay shaqo, laakiin waxa ka maqan shaqaale buuxin kara. Common Core wuxuu shiishka saaraa xirfadaha dhabta ah ee ardaydu u baahan yihiin si ay shaqo u helaan ayna noqdaan qaar la tartami kara suuqa shaqada.

Waa maxay jadowalka wakhtiga isticalka Common Core ee dugsiyada Washington?

Xafiiska gobolka ee Kormeeraha Guud ee Barista Dadwayne (OSPI) wuxuu kala shaqaynayey dugsiyada, degmooyinka iyo macalimiinta qorshaha kala-guurka – oo ay kujiraan hagayaasha fulinta, taageerooyinka deegaanka iyo goboleed, tabobarka macalinka iyo khayraadka – ilaa 2011. Heerarka Common Core waxa si buuxda looga fuliyey dugsiyada Washington sannad dugsiyeedka 2013-14. 2014-15, ardaydu waxay qaadan imtixaano cusub xisaabta iyo farshaxanada luuqadda Ingiriiska kuwaasi oo waafaqsan heerarka Common Core looguna talagalay inay noqdaan cabbir fiican waxa ardaydu yaqaanaan oo fahmaan.

Waa kana jadowalka wakhtigu:

2010	OSPI iyo Guddida Waxbarashada Gobolku waxay dib-u-eegaan heerarka barasho ee jira waxayna sameeyaan falanqayn dhibta iyo dheefta hirgalinta Common Core.
Luulyo 2011	Heerarka Gobolka Common Core waxa si rasmi ah u hirgaliyey Kormeeraha Guud ee Gobolka ee Barista Dadwaynaha.
2012-2014	OSPI waxay siisaa agab macalimiinta, degmada iyo maamulayaasha si ay u bilaabaan fulinta. Imtixaano cusub ayaa la tijaabiyey xisaabta iyo farshaxanada luuqadda Ingiriiska.
2013	OSPI, ururrada xirfadlayaasha mutacalimiinta, iyo dadka u dooda waxbarashadu waxay ka wada shaqeeyaan inay dhisaan wacgelin iyo taageero dadwayne Common Core.
2013-2014 (iyo ka socda)	Heerarka Common Core waxa si buuxda looga bilaabay degmo dugsiyeed kasta si loogu dhigo filashooyin sare arday kasta xisaabta iyo farshaxanada luuqadda Ingiriiska.
2014-2015	Heerarka Common Core si buuxda ayaa looga fuliyaa oo imtixaano cusub o xisaabta iyo farshaxanada luuqadda Ingiriiska ah ayaa la bilaabay si si fiican loogu cabbiro aqoonta ardayga looguna abuurto qiyaas mustaqbalka.

Miyey waalidiinta iyo macalimiintu taageeraan Common Core?

Haa, 68% Waalidiinta, macalimiinta iyo dadka adiga oo kale ah ee Washington ayaa waxay taageereen Common Core (tirakoobkii Washington STEM ee Febraayo 2015), 76% waxay oggolaadeen in heerka waxbarashada midaysan ee Ingiriiska iyo xisaabta waddanka oo dhan ay si fiican ugu diyaarin doonto ardayda kuuliyad, shaqada iyo nolosha (tirakoob ay samaysay DHM Research for Partnership for Learning Maayo 2014).

Ma kala hadli karaa macalinka ilmahayga Common Core?

Haa, la hadalka macalinka ilmahaagu waa qaabka ugu fiican ee aad ugu lug yeelan karto waxbarashadiisa. La hadal macalinka, wax ka baro filashooyinka waxbarashada ilmahaaga, kana caawi abuurista qorshe barasho si ay u guulaystaan. Macalimiinta jooga Washington ee taageera Common Core, waxay helaan tabobar joogo ah waxayna aad ugu dadaalaan inay fuliyaan heerarka aadka adag.